Somali

TB Contact Investigations

Minnesota Department of Health

# Baaritaanka Xiriirka TBda

**Waa maxay baarista xiriirka TB?**
Markuu qof qabo cudurka qaaxada TB ee firfircoon, waxa muhiim ah in la hubiyo in cudurku ku faafay dad kale. Marka ay shaqaalaha caafimaadka guud fiiriyaan in cudurku faafay ayaa waxa la yidhaa barista xirrirka.

Qofka TB qabaa wuu faafin karaa cudurka isaga oo aan ka warqabin. Haddii TB ku faafto dad kale, waxay u baahanayaan in ay daawo qaataan si aanay u bukoon.

Warka aad siiso shaqaalaha caafimaadka guud marka la baarayo xirrirka TB waa arrin sir ah. Waa la dhawri doonaa sirtaada gaar ahaaneed.

**Maxaa dhaca xilliga baarista xiriirka TB?**
Shaqaalaha caafimaadka guud wuxu ku su'aali doonaa markaad bukootay ama aad qufuca bilawday. Isku-day inaad ka fekirto **dhamaan** dadkii aad waqti la qaadatay oo ay ku jiraan dadka gurigaaga ku nool martida, caruurta, asxaabta, dadka aad wada shaqaysaan, ama dugsi kula taga, ama caruurta kuu haya. Ka fekir dhawr todobaad ama bilood ilaa markii aad bukootay ama qufuca bilawday. Markaas ayuu shaqaalaha caafimaadka guud garan karaa cidda u baahan in laga eego TB.


**Waxaad u sheegto shaqaalaha caafimaadka guud waa war sir ah**. Shaqaalaha guud ee caafimaadku **cidna uma** sheegi doonaan magacaaga iyo war kale toona adiga oo ogolaada mooyaane. Taasi waxay tahay inaad daacad u noqoto shaqaalaha caafimaadka guud.

Shaqaalaha caafimaadka guud waxay u baahan karaan in ay fiiriyaan meelaha hawadu ka soo gasho guriga ama meelaha aad waqtiga ku qaadato. Taasina waxay dhib-yareyneysaa go'aanka cidda u baahan baaritaan TB.

Shaqaalaha caafimaadka guud ayaa qaban doona cidda u baahan baaritaanka maqaarka TB, laakiin uma sheegi doonaan cidda qabta TB. Waxa baaritaanka loo hor marin doonaa dadka aad isugu waqti badneydeen.

Baaritaanka xiriirkaTB waqti ayuu qaataa. Shaqaaluhu wuxuu hubin doonaa in qof kasta oo u baahan baaritaan helo. Taas awgeed shaqaaluhu waxay u baahan karaan in ay mar ka badan halmar su'aalaan. Waxay ku weydiin karaan su'aalo kala duwan mar danbe si ay u fahmaan warka oo dhan. **Xasuusnow, waxaad u sheegto qofka shaqaalaha caafimaadka guud waa war sir ah.**

**Sidee dadku ku qaadaan TB?**
**Qof kasta wuu qaadi karaa TB**. Marka qof TB u buka xagga sambabka uu qufaco ama hindhiso wuxu hawada raacinayaa jeermis yar yar.



Haddii aad waqti ku ag qaadatay qof u buka TB sambabka, waxa dhici karta inaad neef guratay TB oo sambabkaaga galay. Waa sidaas sida lagu qaadaa qaaxada TB.

Kama qaadi kartid TB qof aad gacanta ka salaantay ama dharka, cuntada, weelka iyo taabasho alaab.

**Daawo fiican ayaa jirta oo lagu daaweeyo LTB1 iyo TB firfircoon.**

**Maxaa u dhaxeeya jirada TB qarsoon iyoTB firfirccon?**
Marka jeermiska TB jirkaaga galo, sida badan wuu jiifsadaa. Kaasna waxa la yiodhaa "**TB qarsoon"** ama "**LTBI."** Jeermiska jiifa eeTB waxba ma yeelo jirka, cudurna kuu keeni maayo. LTBI waxay jiifi kartaa sannoyin badan. Baaritaanka TB ee la yidhaa Mantoux ee maqaarka ayaa sheegi kara in jeermiska TB ku jiro jirkaaga.

**"Jirrada TB firfircoon"** waxa weeyi marka uu jeermiska TB tooso ee bilaabo inuu fido oo jirkana waxyeelo.. Dadka qaba TBda firfircoon aad ayey u bukoon karaan. Waxa ka mid ah astaamaha TB qufac joogta ah, miisaanka oo dhaca, cunto xumo, dhidid habeenimio, qandho, iyo xanuun xabadka ah. Haddii TBdu ku jirto sambabka, waxay ku faafi karta dadka kale.

Ilaa 10% dadka qaba LTBI ayaa yeesha jirrada **TB firfircoon**. Haddii caafimaad darro kale jirtana, khatartu waa ka badan tahay.

# Baaritaanka Xiriirka TBda – bogga 2

**Haddii aan qabo jirada TB firfircoon, sideen u badbaadin karaa ciddayda iyo asxaabtayda?**
Afar arrimood oo muhiim ah samee:

1. **U-qaado daawadaTB sida laguu faray.** Markaad bilawdo daawada TBda, wuxuu takhtarku fiirin doonaa sidaad daawada ku noqoto. Marka daawadu disho badi jeermiska TBda, waa inaad waddo daawada, laakiin ma faafin kartid cudurka TB mar danbe.
2. Ilaa ay joogsanayso faafinta TB, **mar kasta afka masar ku dabool markaad qufacayso**
3. Shaqaalaha caafimaadka guud ayaa kuu sheegi doona sidaad uga dhawreyso inaad jeermiska TB dadka kale ku faafiso.
   - Waa inaad ka joogto fagaarayaasha dadweynaha, shaqada, iyo dugsiga.
   - Inaad iska ilaaliso in marti gurigaaga timaad.
4. **Ka caawi shaqaalaha caafimaadka guud xagga baarista xiriirka TB.** Shaqaalaha caafimaadka guud waxay damacsan yihiin inay ciddaada iyo asxaabtaada ka badbaadiyaan TBda.

**Qof aan aqaan ayaa qaba jirada TBda firfircoon ee sambabka. Waa maxay inaan ogaado?**
Haddii aad waqti badan la qaadatay qof qaba jirrada TB ee firfircoon, Waxaa neefta kuu raaci kara jeermiska TBda. Waxa muhiim ah in TB lagaa baaro.

Waaxda caafimaadka guud ayaa qabanqaabin doona baaritaanka "Mantoux" ee bilashka ah haddii aad u baahato.

Haddii ay natiijadu baaritaanku noqoto **"negative,"** (caadi) jeermiska TB lagama yaabo inuu ku jiro jirkaaga. Si aad u hubiso mar labaad samee baaritaan kale dhawr usbuuc ka bacdi.

Haddii baaritaanka Mantoux noqdo **"positive,"** jeermiska TB ayaa jirkaaga ku jira. Waa inaad takhtar aragto oo lagaa qaado raajato si loo ogaado inaad qabto cudurka TB qarsoon (LTBI) ama firfircoon. Haddii aad qabto LTBI, waxa muhiim ah inaad daawo qaadato disha jeermiska TB.

Caruurta yaryar ama dadka qaba HIV ama caafimaad daro hayso ayaa halis u ah in ay ku faafto TB firfircoon oo u baahan in ay qaataan daawo haddii xataa natiijada Mantoux tahay negative.

Haddii aad leedahay calaamooyinka TB (qufac joogta ah, miisaan dhac, dhidid habeenimo, cunto xumo, qandho, xabbad xanuun), waa inaad takhtar aragto haddii xataa natiijada Mantoux tahay negative.

**Maxaan sameeyaa haddii ay "positive" tahay baaritaanka Mantoux?**
Haddii aad haysato natiijo qoraal ah oo ah positive baaritaanka Mantoux, uma baahnid baaritaan kale. Haddii aanad haysan qoraal, ku noqo baaritaan kale hadda. Dhibna kuuma leh.

**Waa maxay talaalka BCG?**
BCG mar kasta kaama badbaadin karto TB. BCG ma keento natiijo negative ah baaritaanka mantoux. Haddii aad qaadatay talaalka BCG, wax dhib ah kuuma leh baaritaanka TB ee Mantoux ee maqaarku.

MINNESOTA MDH DEPARTMENT OF HEALTH
Tuberculosis Prevention and Control Program
P.O. Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5414
1-877-676-5414
www.health.state.mn.us/tb

6/2005